

# Dabeecada- Kusalaysan Awoodaha Waxbarasho

*Kabka Daryeelka Hore  
iyo Xirfadlayasha  
Waxbarashada*



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**





## Tusmada Buugga

Mahadnaqyo.....	2
Hordhac .....	4
Hadafyada Waxbarashada iyo Horumarinta lyadoo Loo Marayo Waxbarashada Ku Salaysan Dabiiciga. ....	5
Fahmida Kalmadaha Muhiimka.....	8
■ Qeybta Tusmada I: Koritaanka Caruurta iyo Horumarka.....	9
■ Qeybta Tusmada II: Manhajka iyo Barashada Deegaanka .....	10
■ Qeybta Tusmada III: Cabirkha Socda ee Horumarka Canuga .....	17
■ Qeybta Tusmada IV: Shuraakada Qoyska iyo Bulshada .....	18
■ Qeybta Tusmada V: Caafimaadka, Badqabka ama Nafaqada .....	20
■ Qeybta Tusmada VI: Macaamilka.....	23
■ Qeybta Tusmada VII: Qorsheynta iyo Hormarinta Barnaamijka .....	25
■ Qeybta Tusmada VIII: Horumarinta Xirfada iyo Hogaaminta.....	26
Kheyraadka .....	28



## Mahadnaqyo

Dabeeecada-Kusalaysan Awoodaha Waxbarasho: Kabka Daryeelka Hore iyo Xirfadlayasha Waxbarashada waxa la horumariyay iyadoo lala shaqaynayo kooxda shaqada ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarta iyo Qoysaska ee Washington, DCYF), shaqaalaha, dadka iska leh, shuraakada sadexda dhinac, iyo khubarada xarunta ku salaysan dabeeecada iyo xarunta dabiiciga ah ee waxbarashada caruurta. Shaqadan waxa hogaaminaysay Aliza Yair M.Ed., Khabiirka Outdoor Preschool Pilot (Hogaaminta Dugsiyada Barbaarinta Dibada), oo waxa si wayn u taageeray Rae Jing Han M.Ed., kaasoo ka qalinjabyay Jaamacada Washington Kuliyada Waxbarashada.

Dhokumentigan waxa dib u eegis ku sameeyay xubnaha DCYF, Gudida Sadex geesoodka ah ee Waxbarashada Barbaarinta ee Siyaasada Hindiya iyo Xafiiska DCYF Sinanta Haybta iyo Cadaalada Bulshada. Hawshan DCYF waxay qayb ka tahay Outdoor Preschool Pilot (Hogaaminta Dugsiyada Barbaarinta Dibada) (fadlan eeg Warbixinta Ugudambaysa ee Sharci dajinta Hagitaanta Dugsiga Barbaarinta ee Dibada oo lagu heli karo si onlaayn ah <https://dcyf.wa.gov/sites/default/files/pdf/reports/OutdoorPreschoolPilotFinal2020.pdf>).

Lashaqaynta kooxaha shaqada ee mashruucan lagu matalayo kooxaha daneeyaasha waawayn, oo ay kujiraan:

- Kuliyadaha kasocda jaamacadaha iyo koolajyada
- Xubnaha Golaha Diyaarinta Macalimiinta Barbaarinta Caruurta
- Hogaanada iyo shaqaalaha shirkadaha madaxa banaan ee tababarka macalimiinta deegaanka
- Agaasimayaasha iyo shaqaalaha dibada ee dusgiyada barbaarinta
- Khubarada horumarinta cunuga
- Dibada iyo Khubarada waxbarashada deegaanka ee ka socda K-12
- DCYF, shaqaalaha kasocda horumarinta aqoonta iyo tayada qorshayaasha
- Wakiilada sadexda dhinac ah ee khubarada waxbarashada barbaarinta

Waxaan jeelaan lahayn inaan u mahadnaqno shaqsiyaadkan soo socda ee suuro galiyay in shaqadan ay qabsoonto:

**ALIZA YAIR**

*Department of Children,  
Youth, and Families*

**ANNA HOGAN**

*Grandview  
Early Learning Center*

**CAROLINE COOK**

*Polliwog Preschool ee  
Mercer-Slough Environmental  
Education Center*

**DEETTA SIMMONS**

*Cultivate Learning –  
University of Washington*

**DEONNAH MCCLOUD**

*Grandview  
Early Learning Center*

**DIANA STOKES, ED. D**

*Department of Children,  
Youth, and Families*

**ELIZABETH PENHOLLOW, M.ED**

*Wilderness Awareness School*

**ELIZABETH SCHMITZ**

*Office of Superintendent of  
Public Instruction (Xafiska  
Kormeeraha Guud ee  
Waxbarashada Dadweynaha)*

**ELLEN ZITO**

*Department of Children, Youth,  
and Families*

**FELICITY BRUSH**

*Squaxin Island Child  
Development Center*

**JAMIE ASHTON**

*Child Care Aware  
ee Northwest Washington*

**KELLIE MORRILL**

*Tiny Trees Preschool*

**KEN TURNER**

*Office of Superintendent  
of Public Instruction (Xafiska  
Kormeeraha Guud ee  
Waxbarashada Dadweynaha)*

**MARIANNA ROSS**

*Child Care Aware  
ee Washington*

**MARTA BRANCH**

*Sequoia's Treehouse*

**MARY CLEVENGER-BRIGHT, PHD**

*Univeristy of Washington*

**MICHELLE ROBERTS**

*Department of Children,  
Youth, and Families*

**MIKE BROWNE**

*Hilltop Children's Center*

**NICOLE CORBO**

*Roots & Sky  
Nature-Based Learning*

**RAE JING HAN, M.ED.**

*University of Washington College  
of Education*

**REAGAN HENRY**

*Department of Children,  
Youth, and Families*

**SABRINA GREEN**

*Squaxin Island Child  
Development Center*

**SAMANTHA DOLAN, PHD**

*North Seattle College*

**SAVANNAH FENTON**

*Squaxin Island Child  
Development Center*

**SHERI HILL, PHD**

*Policy & System Consultant and  
Trainer SHERI L HILL PHD LLC*

**SIBYL MAER-FILLO**

*Washington Outdoor School*

# Hordhac

Sanadkii 2021, Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska, DCYF), inay noqotaan wakaaladii ugu horaysay ee qaranka ee sharci u haysta outdoor, nature-based (dibada, dabeeecada ku salaysan, ONB) ee barnaamijyada daryeelka caruurta. Barnaamijyadan waxay siinayaan adeegyada waxbarashada barbaarintha caruurta ee goobaha dabiiciga dibada kuyaala, iyo baritaanka manhajka waxbarashada ku salaysan dabiiciga. Aqoonyahada kuwaasoo siiya noocan daryeelka ah waa inay lahaadaan aqoon gaara ah si ay u siiyan badqabaka, khibrada waxbarasho ee dibadeed oo heersare ah.

## Ujeedo

Iyadoo **Aqoonta Muhiimka ah ee Daryeelka Hore iyo Aqoonyahanada Waxbarashada** (EPS\_0023), waxaad ku heli kartaa si onlaayn ah [www.dcyf.wa.gov/publications-library/eps\\_0023](http://www.dcyf.wa.gov/publications-library/eps_0023), daboolista aqoonta asaasiga ah, xirfadaha iyo awoodaha kuwaasoo la rajaynayo dhamaan shaqsyaadka kuwaasoo daryeela caruurta, may siin tilmaamo aqoonyahanada kuwaasoo ka shaqaynaya barnaamijyada ku salaysan dabeeecada dibada. Kabka Waxbarashada Kusalaysan Dabiiciga dhinacyada gaarka ah ee khibrada gaarka ah ee waxbarashada ku salaysan dabiiciga ah, iyo asaaska filashooyinka barayaasha iyo maamulka kuwaasoo siiya noocan waxbarasho ee deegaan. Waaan waydiinay aqoonyahanada barnaamijyada ku salaysan dabiiciga ee isticmaala labada dhokumentiba si loo fahmo xadiga aqoonta, xirfadaha, iyo awoodaha kuwaasoo la xidhiidha natijoooyinka ilmaha.

## BADALISTA TAAGEERADA

Kaabistaani waxay isticmaashaa waxyabaha abaabulka isku midka ah ee dukumeentiga asalka ah, laakiin waxay soo bandhigaysaa qayb-hoosaadyo cusub iyo tilmaameyal u gaar ah waxbarashada iyo daryeelka ku salaysan dabeeecadda iyo dabeeecadda-xudunta u ah mid kasta oo ka mid ah tusmada nuxurka.

**Goobaha Tusmada Cusub ee Qaybhoosaadka**  
Qayb hoosaadka cusub, Kor u Qaadista Aqoonsiga iyo Waxyabaha la Xidhiidha Dabeeecada, waa barnaamijyada gaarka ah ee ONB, oo waxaa laga heli karaa Goobta Tusmada II - Manhajka iyo Waxbarashada Deegaanka. Qayb hoosaadkani waxay koobsanaysaa fikrada in caruurtu ay horumarin karto dareenka jiritaanka iyo xidhiidhka dunida kala dhixeeeyaa dabiiciga kaasoo ku xidhan fahamkooda xidhiidhka ka dhixeeeyaa bulshada deegaanka.



## Ilaalinta Noocyada Kala Duwan ee Barnaamijka Kusalaysan-Dabeeecada ee Maskaxda Kujira

Waxa jira tiro badan oo barnaamijyo kala duwan ah kuwaasoo ka midaysan muhiimada khibrada dabiiciga ah ee caruurta. Awoodaha Waxbarasho ee Kusalaysan Dabiiciga waxay wax kaqabanayaan iyagoo calaamadinaya aqoonta, xirfadaha iyo awoodaha kuwaasoo muhiim u ah aqoonyahanada ka shaqaynaya barnaamijyada asaasiga ah ee ku salaysan dabeeecada dibada (tani waxay ka muuqan doontaa farta **khadka badan**), iyo sidoo kale tilmaamayaal guud oo badan (kuwani waxay ka muuqan doonaan farta caadiga ah) kuwaas oo khuseeya dhammaan barnaamijyada isku dhafan dabeeecadda iyo khibradaha dabiiciga ah.

# Hadafyada Waxbarashada iyo Horumarinta Iyadoo Loo Marayo Waxbarashada Ku Salaysan Dabiiciga

Waxbarashada ku salaysan dabiiciga iyo xarumaha waxbarashada dabiiciga waxay u leeyihiin faa'idooyin badan waxbarashada caruurta yar-yar iyo horumarinta. 2019 falanqaynta-meta daraasadaha ayaa baadhay xidhiidka sabab-iyo-saamaynta u dhheeeyaa waayo-aragnimada dabeeecadda iyo natiijooinka barashada waxaana la helay "caddayn [taasi] si xooggan u soo jeedinaya in waayo-aragnimada dabeeecadda ay kor u qaaddida aqoonta waxbarashada, horumarinta shakhsi ahaaneed, iyo mas'uuliyadda deegaanka."<sup>1</sup>

Marka la eego waxbarashada barbaarinta gaar ahaan, bannaanka, ciyaarta ku salaysan dabeeecadda ayaa la muujiyey inay siiso caruurta faa'idooyin jidheed, garasho, bulsho iyo shucuureed. Qaar kamid ah faa'idooyinka ayaa xagan hoose lagu liisteyay:

## Jidhka

- Waxay wanaajinaysaa koritaanka iyo horumarinta jidhka (tusaale, caafimaadka lafaha, wadashaqaynta dheelitirka, awooda siiwaditaanka, goobta taxadarka, awooda muhiimka ah, iyo taagnaanta);
- Adkaynta nidaamka difaaca;
- Kor u qaadista hawlahu mudada dheer ee jidhka.

## Garashada

- Waxay wanaajinaysaa shaqada fulinta iyo awoodaha ismaamulka;
- Waxay kordinaysaa indho-indhaynta iyo xirfadaha xalinta khilaafaadka;
- Waxay kordinaysaa dareenka iyo awood saarista; iyo
- Waxay caawinaysaa adkaysiga caruurta, madaxbanaanida, iyo kalsoonida qofeed.

## Bulshada iyo Shucuurtta

- Waxay hoos u dhigtaa iskubuuqa, warwarka, iyo walbahaarka;
- Waxay dhisaysaa dareen aasasi ah oo la xidhiidha adiga, dadka kale, goobta, iyo dunida balaadhan;
- Waxay caawisaa horumarinta dareenka ee adduunka dabiiciga ah.

1. Kuo M, Barnes M and Jordan C (2019) Miyey khibradaha deegaanku kor u qaadaan waxbarashada? Cadaymaha horusocodka ee xidhiidka sababaynta- iyo-saamaynta. Xuduudaha Cilmi-nafsiya 10:305. doi: 10.3389/fpsyg.2019.00305. <https://www.frontiersin.org/articles/10.3389/fpsyg.2019.00305/full>

Waxbarashada ku salaysan dabiiciga iyo dabeeecadda ayaa sidoo kale kor u qaadi karta aqoonsiga deegaanka ee carruurta iyo isku xidhnaanta kala dhaxaysa dabeeecadda. DCYF waxay siinaysaa qeexitaanadan soo socda iyo sharaxaadaha faa'idada tooska ah:

*Aqoonsiga deegaanka ee carruurta iyo isku xidhnaanta kala dhaxaysa dabeeecadda waxa lagu qeexaa dareenka jira iyo xidhiidhka dunida dabiiciga ah taasoo koraysa laga bilaabo ogaanshaha iyo fahamka xidhiidhada ku lifaaqan ee bulshada dabiiciga ah. Dabiiciga la xidhiidhada goobaha aqoonsiga deegaanka ee aadanaha kujira bulshada deegaanka, sida kasoo horjeeda inta xaga sare kuxusan ama dibada ka ah. Tani, waa markii, caawinta horumarka ee sii jiraysa, micnaha iyo kalaroga xidhiidhka ka dhheeeyaa dunida dabiiciga ah.*

Isku xidhnaanshaha saameeya dabeeecada fikirada iyo talaabooyinka shaqsiga ee ku aadan dabiiciga. Iyadoo loo marayo isdhhexgalka dunida dabiiciga ah, caruurta waxa si muuqata ula xidhiidhi karaan oo ay samayn karaan dareeno wanaagsan iyo/ama xidhiidh cagsi ah oo la xidhiidha dabiiciga.<sup>2</sup> Samaynta aqoonsiga deegaanka, carruurt waxay koraan iyagoo qaba dareen ku dhaw dabiiciga oo u arka nafahooda inay qayb ka yihiin dabiiciga.<sup>3</sup> Dabeeecadda, sidaas darteed, waxaa lagu daraa nidaamka isdhhexgalka deegaanka oo qaabeeyaa horumarka aadanaha.

2. Barrable, A. (2019) Kiiska la xidhiidha dabiiciga iyadoo ah hadaf madaxbanaan oo ah waxbarashada barbaarinta caruurta. *The International Journal of Early Childhood Environmental Education (Joornaalka Caalamiga ah ee Waxbarashada Barbaarinta Caruurta)*, 6(2), p. 59 ISSN: 2331-0464 (onlaayn)

3. Wilson, R. (2019) Waa maxay dabeeecadu? *The International Journal of Early Childhood Environmental Education (Joornaalka Caalamiga ah ee Waxbarashada Barbaarinta Caruurta)*, 7(1), p.26 ISSN: 2331-0464 (onlaayn)

## Hadafyada Waxbarashada iyo Horumarinta Iyadoo Loo Marayo Waxbarashada Ku Salaysan Dabiiciga (Socda)

Hadafyada waxbarashada deegaanka ee barbaarinta caruurta iyo aqoonta waxay si dhaw ula xidhiidhaan fikradan la xidhiidhka dabiiciga iyo aqoonsiga deegaan. North American Association of Environmental Education (Ururka Waqooyiga Maraykanka ee Waxbarashada Deegaanka) waxay soo saareen tilmaamo wanaagsan oo ku saabsan Barnaamijaya Excellence For Early Childhood Environmental Education (Waxbarashada Deegaanka ee Barbaarinta Caruurta). Si aad u dajisato daabacadan, tag [https://cdn.naaee.org/sites/default/files/final\\_ecee\\_guidelines\\_from\\_chromographics\\_lo\\_res.pdf](https://cdn.naaee.org/sites/default/files/final_ecee_guidelines_from_chromographics_lo_res.pdf). Waxay rumaysanyihii waxbarashada deegaanka waa inay ku bilaabmataa barbaarinta nolosha shaqsyaadka markaa ma jiri doono wakhti lagu qaabeeyo fikradaha iyo aragtiyaha kuwaasoo u ogalaanaya bogaadin iyo horusocod ku aadan dunida dabiiciga ah.

*"Aragtiyaha shaqsiga ah, fikradaha, iyo xidhiidhada la xidhiidha dabiiciga waa hadafyada muhiimka ah ee heerkan, iyo fudaydinta khibradaha kala duwan ee cunug ilaa cunug... Carurta kuwaasoo ixtiraama deegaanka waxay dareemaan ku xidhnaansho dareen leh oo ku aadan dunida dabiiciga ah iyo inay si qoto dheer u fahmaan xidhiidhka ka dhexeeya nafahooda iyo dabiiciga, waxay noqon doonaan muwaadinin aqoon u leh deegaanka. Hawsha waxbarashada deegaanka ee carruurta yar-yar waa inay abuurto xidhiidhka u dhexeeya carruurta iyo dabiiciga."*

Waxaan aaminsanahay in dhammaan carruurta, iyadoon loo eegin goobta waxbarashada, ay ka faa'iideysan karaan la kulanka deegaanka dabiiciga ah, oo ay ku dhiirigeliyan dhammaan xirfadlayasha inay ku daraan khibradaha dabeecadda iyo barnaamijka walxaha dabiiciga ah. Barayaasha iyo maamulayaasha danaynaya inay kobciyaan barnaamijkooda aaya laga yaabaa inay adeegsadaan karti-xirfadeedkan si ay u ururiyaan fikrdo iyo xeelado, oo ay xitaa u isticmaalaan maclumaadka si ay u hagaan waxbarashadooda xirfadeed ee mustaqbalka.



## Siinta Jawaabta Dhaqanka iyo Khibradaha Xaqijinta Dhaqanka

### Dabeecada Kusalaysan Awoodaha Daryelka

**Barbaarinta Caruurta** waxaa ka mid ah awooda lagu maamuusayo madax-bannaanida asaliga ah, iyo taageeridda xirfadlayasha Washington oo dhan si ay u kobciyaan xidhiidhka qabaailka maxalliga ah iyo in ay hirgeliyaan manhajka qabil ahaan la ansixiyay. Maclumaad dheeraad ah oo ku saabsan heshiisyada lala gal qabaailka Gobolka Washington, fadlan booqo [www.washingtonhistory.org/education/curriculum/treatytrail/readings/](http://www.washingtonhistory.org/education/curriculum/treatytrail/readings/) iyo <https://nwttreatytribes.org/treaties/>

Iyadoo lagu gudo jiro **Dabeecada Kusalaysan Awooda Daryelka Caruurta iyo Aqoonyahanada Waxbarashada** Waxaa jira awood lagu taageerayo sinnaanta jinsiyadda iyo caddaaladda bulshada kuwaas oo si gaar ah u khuseeya barnaamijaya dabeecadda ku salaysan. Dhaqamadani waxay taageeraan xirfadlayasha inay wax ka bartaan oo fahmaan carruurta iyo qoysaska aragtiyadooda iyo dhaqamada la xidhiidha dabiiciga iyo ka maqnaanshaha dibadda, iyo sidoo kale welwelka deegaanka ee bulshada guud ahaan. Iyada oo ku saleysan hab-dhaqankan, iyo sidoo kale iyada oo loo marayo caddaaladda bulsheed ee ballaadhan iyo dadaalka ka-hortagga cunsuriyadda ee barnaamijka waxbarashada barbaarinta caruurta, dhaqamada lagu daray kabitaankan waa in la waafajiyaa si loo bixiyo khibrado dhaqan ahaan jawaab celin iyo dhaqan leh oo khuseeya tirakoobka (tirakoobyada) ee barnaamijka.

## Hadafyada Waxbarashada iyo Horumarinta Iyadoo Loo Marayo Waxbarashada Ku Salaysan Dabiiciga (Socda)

### Sharafta Madaxbanaanida Asalka ah

#### Dabeecada Kusalaysan Awoodaha Daryeelka

**Waxbarasho** waxaa ka mid ah awooda lagu maamuusayo madax-bannaanida asaliga ah, iyo taageeridda xirfadlayaasha Washington oo dhan si ay u kobciyaan xidhiidhka qabaa'ilka maxalliga ah iyo in ay hirgeliyaan manhajka qabil ahaan la ansixiyay.

Dadka dhaladka ah ee Washington waa dad hodan ah sidii bulshooyin ay ka buuxaan hanti, xoog iyo qoysas caafimaad qaba, iyagoo la midaysan dhulka ku hareeraysan, hada iyo wakhti hore. Maanta in badan oo ka mid ah dadka u dhashay ayaa la halgamaya dhibaatadii jiilkii ee ay u soo dhabar adaygeen xeeladaha isku milanka ee dawladda dhexe; Kuwaas waxaa ka mid ah gumeysiga, xasuuna, ka saarista dhulalka awoowayaasha, iskuulada hoyga ah, iyo dulmiga joogtada ah ee xuquuqda dadka dhaladka ah. Waa muhiim in muwaadiniinta aan u dhalanin ay fahmaan oo ay gartaan taariikhdan adag iyo saamaynta ay leedahay. Taariikhdbani waxay siinaysaa aqoonyahanada ku salaysan dabeecadda mas'uuliyyad naxariis leh iyo fursad ay ku sharfaan madax-bannaanida dadka dhaladka ah oo ay si firfircoona u taageeraan dadka dhaladka ah taas oo qayb ka ah dadaalkooda caddaaladda jinsiyadeed iyo bulsho.

Qabiil kasta oo ku nool Washington waa qaran madax-bannaan, leh taariikh, dhaqan, iyo nidaam maamul oo gaar ah dhammaan qabaa'ilka federaalku aqoonsan yahay waxay xidhiidh dawlad ilaa dawlad la leeyihiin gobolka.<sup>4</sup> Aqoonyahanada aan u dhalan Washington waa inay baadhitaan ku sameeyaan qabiiladooda maxalliga ah iyo samaynta dadaalkan waxay abuuri kartaa xidhiidh wanaagsan oo ay la yeeshaan deriskooda. Abuuritaanka iyo kobcinta xidhiidhka bulshooyinka qabaa'ilka, aqoonyahanada aan u dhalan waxay sidoo kale ka fogaan karaan ka qayb qaadashada qoondaynta dhaqanka ama qaab-dhismeekooda, waxayna u habayn karaan ku-dhaqankooda iyo manhajkooda si ay u ixtiraamaan dhaqanka, hiddaha, luqadda iyo xurmaynta qabiilka gaarka ah si xushmad leh.

#### John McCay (lulilas) Ilaa Wakhtiga Manjahka Xuska

waxaa naqshadeeyay barayaasha Dhaladka ah si ay ardaydeenna hore u helaan fikrado la xidhiidhka madax-bannaanida qabiilka iyo taariikhda qabiilka maxalliga ah, waxaana ansixiyay Shirweynaha Qaba'a'ilka ee Waxbarashada. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, tag [www.k12.wa.us/student-success/resources-subject-area/time-immemorial-tribal-sovereignty-washington-state](http://www.k12.wa.us/student-success/resources-subject-area/time-immemorial-tribal-sovereignty-washington-state). Casharrada iyo agabka John McCay (lulilas) Ilaa Wakhtiga Manjahka Xuska waa meel ku salaysan oo ay ku jiraan mawduucyada dabeecadda udub dhexaad u ah ee waxbarashada carruurta, sidaas darteedna waxay si gaar ah u khuseeyaan manhajka barnaamijka ku salaysan dabeecadda. Manhajku waa qaab dhismeed, si kastaba ha ahaatee, mar kasta oo ay suurtogal tahay, waa in manhajka lagu dhaqo hab qabiil. Qabiiladu xataa waxa laga yaabaa inay haystaan manhaj u gaar ah oo loogu talagalay barayaasha aan u dhalan, sida Manhajka Spokane Tribal Lifeways ee Spokane oo laga heli karo onlayn <https://spokanetc.com/>. Awoodaha lagu soo daray dhukumeentigani waxay ku tiirsan yihiin aqoonsiga qabiilka uu barnaamijku ku saleysan yahay dhulalka awoowayaashood iyo dhisidda xidhiidhka gogol dhiskaas. Marka ay sidaas sameeyaan, carruurtu waxay baran karaan taariikhda gaarka ah ee dadyowga asaliga ah halka ay ku nool yihiin, iyaga oo abuuraya dareen qoto dheer oo xidhiidh la leh Dabeecada ku hareeraysan.

4. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan heshiisyada lala gal qabaa'ilka Gobolka Washington, fadlan booqo <http://www.washingtonhistory.org/education/curriculum/treatytrail/readings/> and <https://nwttreatytribes.org/treaties/>

## Faa'idooyinka Dadka Waawayn iyo Bulshooyinka

Waxaa xusid mudan in waayo-aragnimada ku saleysan dabeeccadda iyo dabeeccadda ku saleysan ay sidoo kale saameyn ku yeelato badqabka maskaxeed iyo jidheed ee dadka waaweyn, oo ay ku jiraan aqoonyananada la shaqeeya carruurta yaryar. Saamaynta ka-qaybgalka hawlahu ku-salaysan dabeeccadda ama dabeeccad-dabeeccadda kusalaysan dadka waaweyn waxaa ka mid ah iskubuuqa oo yaraada, niyad wanaag, iyo dareen xooggan oo midnimada deriska.<sup>5</sup> Deegaanka dabiiciga ah waxa dadka usoo qora dhakhtarada si ay uga caawiso dhiigkarka, warwarka, iyo cayilnaanta,<sup>6</sup> oo daraasad 2019 ah oo lagu sameeyay 20,000 oo qof ayaa lagu ogaaday in "dadka ku qaata laba saacadood usbuucii meelaha cagaaran - goobaha nasashada maxalliga ah ama deegaan kale oo dabiici ah, hal mar ama kala fogaaday booqashooyin dhowr ah - waxay aad ugu dhowdahay inay ka sheegaan caafimaad wanaagsan iyo xasilooni nafsi ah. in ka badan kuwa aan tagin."<sup>7</sup>

5. [www.takingcharge.csh.umn.edu/how-does-nature-impact-our-wellbeing#:~:text=Being%20in%20nature%2C%20or%20even,the%20production%20of%20stress%20hormones](http://www.takingcharge.csh.umn.edu/how-does-nature-impact-our-wellbeing#:~:text=Being%20in%20nature%2C%20or%20even,the%20production%20of%20stress%20hormones)
6. <https://parkrxamerica.org/patients/human-benefits-of-nature.php>
7. <https://e360.yale.edu/features/ecopsychology-how-immersion-in-nature-benefits-your-health>

## Fahamka Erayada Muhiimka ah

Waxaad ka raadin kartaa liiska qeexitaanada oo dhamaystiran erayada muhiimka ah ee la xidhiidhka dibada, barnaamijyada ku salaysan dabeeccada WAC 110-302: <https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-302>

**Biome:** bulsho weyn oo si dabiici ah ugu dhacday flora iyo fauna (hoos eeg) dadka dagan deegaanada wawayn.

**Nidaam deegaan:** laan ka mid ah baayoolajiga oo ka hadasha xidhiidhka noolaha dhexdooda iyo deegaanka ku xeeran. **Flora:** dhirta kabaxda deegaan gobol gaar ah, deegaan, ama wakhti juqraafeed.

**Fauna:** xayaanka gobol gaar ah, deegaan, ama wakhtiga juqraafiyeed.

"Bulshadu waxay horumaraan marka dadka ka tirsani ay helaan fursado waayo-aragnimo macno leh oo dibadda ah, hadday joogaan goobta nasasho ee u dhow, beerta ama xeebta badda. Soo bixista bannaanka waxay la xidhiidhaa nafaheena, midba midka kale iyo aduunka inagu xeeran, taas oo ina xasuusinaya inaan qayb ka nahay sheeko aad u weyn. Dhisidda xidhiidhkan waxay kordhisaa tayada nolosha dadka, caafimaadka iyo tayada bulshada, kuwaas oo ah faa'idooyinka qof kastaa mudan yahay. Wuxaan leenahay masuuliyad wadaag ah inaan albaabada u furno dhammaan dadka, iyadoon loo eegin meesha ay ku nool yihiin ama asalkooda, iyo hubinta waayo-aragnimadooda dibadda inay noqoto mid wanaagsan oo faa'iido leh. Markasta oo ay bataan dadka sidaan ula xidhiidha dabeeccadda, waxaa sii badanaya bulshooyinkeena oo sii xoogeysanaya oo aan dhammaanteen ka faa'iideysanno"

– rethinkoutside.org

**Goobaha Dabiiciga ah:** waa dhul dabiici ah guud ahaan, badh-dabiici ah, ama la beeray oo ay ku jiraan dhirta, xayaanka, iyo muuqaalada kale iyo waxsoosaarka dhulka. Meelo ay naqshadeeyeen oo ay abuureen dabeeccadda iyo xoogagga dabiiciga ah.

**Khatarta Jirta:** Hawlahu jidheed iyo ciyaar xiiso iyo xamaasad leh oo ay jirto halis dhaawac jidheed. Khatarta jirta ee barnaamijyada ONB waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn ciyaarta ku lug leh dhererka, xawaarah, qalabka, ama walxaha khatarta ah u dhow (tusaale, wax ku dhacaan), iyo meelaha ay carruurtu ku lumi karaan.



## HEERKA 1-AAD

- Waxa uu aqoonsan yahay in korriinka cunuga/ bini'aadmigu uu ku xidhan yahay dabeeecadda iyo noolaha kale.
- Wuxuu aqoonsanyahay muhiimada hawsha ciyarta dibada.
- Wuxuu aqoonsadaa in carruurtu yihiin arday firfircoon oo ay wax ku bartaan dhammaan dareenkooda.

## HEERKA 2-AAD

- Wuxuu u sharaxaya faa'idooyinka caafimaad ee dibada, waxbarashada ku salaysan dabeeecada.

## HEERKA 3-AAD

- Wuxuu sharaxaya sida ay caruurtu u baranayaan si ay u maareeyaan khatarta loo marayo ciyarta ku salaysan deegaamada.





## II MANHAJKA IYO BARASHADA DEEGAANKA

### Abuurista Deegaan Waxbarasho iyo Manhajka Guud

#### HEERKA 1-AAD

- Aqoonso dabeeecada macalin ahaan.
- Waxay ku daraysaa qaybaha dabacsan, oo ay ku jiraan alaabta dabiiciga ah, gudaha iyo dibadda meelaha lagu ciyaaro.
- Waxay siinaysaa dhamaan caruurta fursado ay ku ciyaraan iyo ogaanshaha goobaha dibada ah ee dabiiciga ah maalin kasta.**

#### HEERKA 2-AAD

- Wuxuu aqoonsadaa manhajka iyo kheyraadka ku saleysan dabiicadda ama dabiicada, sida ku habboon goobtooda.

#### HEERKA 3-AAD

- Shuraakada qabaa'ilka maxalliga ah halka ay suurtagal tahay si ay u taageeraan mudnaanta manhajka wadaniga ah, iyo/ama hirgeliyaan manhajka waxbarashada barbaarinta caruurta ee John McCay (lulilas) Ilaa Wakhtiga Manjahka Xuska.
- Wuxuu abuuraa ciyaro bannaanka ah iyo goobo waxbarasho oo ku habboon oo ku martiqaadaya noocyada deegaanka maxaliga ah iyo nidaam deegaaneedka.
- Isticmaalka aqoonta deegaanka dabiiciga ah ee deegaanka xilliyada oo dhan iyo flora iyo fauna maxaliga ah si ay u taageerto ka qayb qaadashada carruurta oo dhan waxqabadyada maalinlaha ah iyo fursadaha waxbarasho.**
- Lashaqayso waxyaabo badan oo kala duwan oo dabiici ah oo ku jira deegaano waxbarasho oo gudaha iyo dibadda ah.

#### HEERKA 4-AAD

- Wuxuu aqoonsadaa oo uu ku daraa mudnaanta manhajka wadaniga ah iyadoo lala kaashanayo qabaa'ilka deegaanka.
- Wuxuu qiimeeyaa kala duwanaanshiyaha manhajka ku saleysan dabeeecadda ama dabeeecadda ku saleysan ku habboonaantooda heerarka korriinka iyo danaha carruurta ee goobtooda gaarka ah.
- Waxay horumarisaa jawi waxbarasho oo waxay bixisa fursado kala duwan oo ciyarta ah, oo ay ku jiraan fursadaha ciyarta kooxeed iyo shaqsi ahaanba.

## Kor Uqaadista Koritaanka Jidheed

### HEERKA 1-AAD

- Waxa uu aqoonsanayaa in ka-qaybgalka carruurta ee ciyaaraha khatarta ah iyo kuwa adag ay taageerto horumarinta awoodaha jidheed, marka khatarta ay ku habboon tahay heerarka korriinka carruurta.

### HEERKA 2-AAD

- Waxay siisaa carruurtu fursado ay wax ku bartaan oo ay dareemaan aduunkooda iyagoo isticmaalaya dareenadooda.
- Waxa uu aqoonsanayaa in dibadda, waayo-aragnimada ku salaysan dabeeccadda ay lagama maarmaan u tahay dhammaan koritaanka caafimaadka leh ee carruurta.
- Waxa uu aqoonsan yahay in ka baxsanaanta agagaarka dabiiciga ah ay hagaajiso koritaanka jidheed ee carruurta.**
- Waxay u ogolaataa carruurta inay galaan ciyaar khatar ah oo adag, oo ku habboon heerarka korriinka carruurta, oo waxay siisaa kormeer iyo taageero dhow, haddii loo baahdo.**


### HEERKA 3-AAD

- Waxay taageertaa carruurta inay ogaadaan oo ay raadiyaan ifafaalaha dabiiciga ah ee wanaajiyaa korriinka ilmaha, sida in ay meel fog wax ka eegaan, dhegaystaan dhawaqa meel fog ka imanaya, in ay ku socdaan oo ay taabtaan waxyabo kala duwan, iyo u dhowaanshaha dhirta iyo sifooyinka biyaha.
- Waxay siisaa dhammaan carruurta fursado ay ku galaan ciyaar khatar ah oo adag, iyadoo u samaynaysa la-qabsiga ilmo kasta oo ku salaysan awoodahooda iyo baahiyahooda shaqsiyed.**

### HEERKA 4-AAD

- Waxay ku kor u qaadaa fahamka adduunka jidheed iyada oo loo marayo waxqabadyo iyo qalab si kor loogu qaado indho-indheynta iyada oo loo marayo dareenkooda (tusaale ahaan, dhegaha la duubo, muraayadaha indhaha, iwm.)
- Waxay dhiirigelisaa oo balaadhisa fursadaha carruurta si ay ugu maraan khataraha iyo caqabadaha ciyarta shaqaynaysa ee bannaanka iyadoo qiimaynaysa horumarka korriinka carruurta iyo ka qayb qaadashada dejinta yoolalka.





## Kor Uqaadista Koritaanka Garashada

### HEERKA 1-AAD

- Waxay siisaa carruurta agab dabiici ah oo ay ku baran karaan gacmo ku dheelista iyo fursado waxbarasho oo badan.
- Waxay ku dhiirigalisaar caruuerta inay isticmaalaan dhamaan dareenadooda.

### HEERKA 2-AAD

- Waxay aqoonsataa faa'idooyinka khataraha ciyarta ee koritaanka garashada caruuerta.
- Waxay siisaa barashada khibrad la xidhiidha dunida dabiiciga ah ee heerarka kala duwan ee koritaanka.
- Waxa uu aqoonsan yahay in ka baxsanaanta agagaarka dabiiciga ah ay hagaajiso koritaanka Garashada carruurta.**

### HEERKA 3-AAD

- Waxay siisaa qalabka iyo agabka fikradeed iyo alaabta carruurta si ay u baaraan bannaanka/deegaanka dabiiciga ah, oo ay ku jiraan ururinta, duubista, iyo isgaadhsiinta macluumaadka.
- Waxay ku hagtaa caruuerta inay qiimeeyaan khataraha kahor intaanay u hawlgalin ciyaar ay khatar kasoo waajahayso.
- Waxay ka caawisaa carruurta inay fiirsadaan tayada (tusaale, qaabka, midabka, qaabka), qaababka, ifafaalaha, meertada nolosha, waxyabaha ay iskaga mid yihiin iyo kala duwanaanshaha, sababta iyo saamaynta, iyo isbeddelada waqtii ka dib deegaanka dabiiciga ah.**
- Waxay siisaa fursadaha doorashada iyo waxqabadyada uu ilmuhi hoggaamiyo inta lagu jiro bannaanka, ciyarta dabeeecadda waxayna raacdaa hoggaanka iyo feejignaanta carruurta.**

### HEERKA 4-AAD

- Waxay taageertaa carruurta inay fahmaan xidhiidhka isku xidhan iyo xidhiidhka ka dhexeeya noolaha iyo la macaamilka ay la leeyihiin dunida dabiiciga ah.
- Wuxuu aqoonsadaa oo qeexayaa fikirkasayniska iyo hababka injineernimada ee dabiiciga ah.
- Waxay dhisaysaa xidhiidh ka dhexeeya dabeeecada iyo xisaabta, sayniska, suugaanta, cilmiga bulshada, iyo hawlaha barashada fanka.

### HEERKA 5-AAD

- Waxay tilmaamaysaa daah karogista iyo isticmaalka laga bilaabo dunida dabiiciga ah si loo caawiyo fikirkasayniseed ee caruurta iyo nidaamyada injineernimo.

## Kor Uqaadista Luuqada iyo Horumarinta Xidhiidhka

### HEERKA 1-AAD

- Waxay siisaa ereyo carruurta marka ay tilmaamayaan waxay arkaan, uriyaan, maqlaan, dhadhamiyaan, taabtaan, iyo waxay dareemayaan adduunka dabiiciga ah.
- Wuxuu adeegsadaa agab wax-akhris, sheekoojin iyo heeso qeexaya oo ku xidhan deegaanka dabiiciga ah.

### HEERKA 2-AAD

- Af ahaan wuxuu tilmaamayaa dhirta, xayawaanka iyo walxaha kale ee dabiiciga ee caadiga ah.
- Wuxuu adeegsadaa agab waxbarasho oo gudaha iyo dibadda ah oo hodan ku ah si uu u dhiso ereyo ku saabsan adduunka dabiiciga ah.

### HEERKA 3-AAD

- Waxay ku taageertaa carruurta duubista iyo dib u milicsiga waayo-aragnimadooda ciyarta bannaanka/ dabeeecadda iyagoo isticmaalaya agab iyo qaabab kala duwan.
- Waxay ka faa'idsaysaa sheekooinka qaniga ku ah erayada iyo waxyaabaha kхиyaliga ah ee ku wareegsan deegaanka.**



## Kor Uqaadista Horumarinta Bulsheed/Dareen

### HEERKA 1-AAD

